



Muslimku waa qofka ay muslimiintu ka nabad galeen carabkiisa iyo gacantiisaba, muhaajirkuna waa qofka ka dheeraada wixii Ilaahay ka reebay

Cabdullaahi Binu Camar -Allaha ka raali ahaado- isaga iyo aabhiye wuxuu ka wariyey Nabiga scw inuu yiri: "Muslimku waa qofka ay muslimiintu ka nabad galeen carabkiisa iyo gacantiisaba, muhaajirkuna waa qofka ka dheeraada wixii Ilaahay ka reebay."

[Xadiis Saxiix ah] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabigu-naxariis iyo nabadi korkiisa ha ahaatee- wuxuu sheegay in Muslimka islaamnimadiisu kaamilka tahay uu yahay midka Muslimiintu ka nabad galaan carabkiisa ee aan caayin, oo nacaladin, oo xamanin, oo dadka la dhex qaadin wax dhib ah oo uu ka gaysto carabkiisa. Muslimiintuna ka nabad galaan gacantiisa oo aan ku xad gudbin, oo aan ku qaadan xoolahooda xaq daro, iyo wixii la mida. Muhaajirkuna waa qofka ka dheeraada waxa uu Ilaahay ka xarimay.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/10101>

